QAYB CUSUB

WAC 296-62-600 Shuruudaha ogeysiinta iyo ka-warbixinta xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka guud ee loogu talagalay cudurrada faafa iyo kuwa la iska kala qaado.

[]

QAYB CUSUB

WAC 296-62-60001 Ujeeddada iyo baaxadda. WAC 296-62-600 ilaa 296-62-60005 waxay bixinayaan shuruudaha loogu talagalay u sheegidda dillaaca cudurrada faafa ama la iska kala qaado ee waaxda caafimaadka iyo ammaanka shaqada (DOSH) ee L&I iyo ogeysiinta shaqaalaha wajahidda suuragalka ah ama halista ay ugu jiraan cudurrada faafa iyo kuwa la iska kala qaado inta lagu guda jiro xaaladda degdegga ah ee caafimaadka guud sida lagu qeexay xeerkan eenna waafaqsan Sharciga Jaangooyooyinka Shaqada ee Xaaladda Degdegga ah ee Caafimaadka; qaybaha 2aad iyo 3aad, cutubka 252, Sharciyada 2021. Shuruudahan waxaa lagu dabakhayaa loo-shaqeeyayaasha ku dhaqan gobolka Washington inta lagu guda jiro xaaladda degdegga ah ee caafimaadka guud.

[]

QAYB CUSUB

WAC 296-62-60002 Qeexid. Shaqaalaha caymisan. Waxaa loola jeedaa shaqaale kasta oo uu loo-shaqeeyaha ka mas'uul yahay in uu ku diiwaangeliyo dhaawacooda iyo jiradoodaba diiwaanka 300 OSHA ee loo-shaqeeyaha iyadoo la raacayo WAC 296-27-02103, oo ay ku jiraan shaqaalaha ka socda adeegga caawimaadda ku-meelgaarka ah, adeegga kiraysashada shaqaalaha, adeegga keenista hawlwadeennada haddii ay u kormeerayaan shaqaalaha si maalinle ah oo waafaqsan WAC 296-27-02103(2).

Xaaladda degdegga ah ee caafimaadka guud. Waxaa loola jeedaa baaqa iyo amarka ku saabsan cudur kasta ee faafa ama la iska kala qaado, oo ay ku jiraan cudurrada safmarka ah iyo waxaanna loo soosaaraa sidan soo socota:

(a) Madaxweynaha Mareykanka wuxuu ku dhawaaqey xaalad gobol ama qaran oo degdeg ah oo khuseysa degmo kasta oo ku taalla gobolka Washington; ama

(b) Guddoomiyaha gobolka Washington waxaa uu ku dhawaawey xaalad degdeg ah oo waafaqsan RCW 43.06.010(12) oo taabaneysa degmo kasta oo ka tirsan gobolka.

[]

QAYB CUSUB

WAC 296-62-60003 Tilmaamo guud. (1) WAC 296-62-600 ilaa 296-62-60005 uma baahna in shaqaale kasta uu u sheego xaalad caafimaad kasta ama cudurrada laga helay cidda ay u shaqeeyaan.

(2) WAC 296-62-600 ilaa 296-62-60005 wax kama beddelaa ama meesha kama saaraan waajibaadyo ka warbixin kasta oo kale ee uu leeyahay loo-shaqeeyaha iyadoo la raacayo sharciyada federaalka ama gobolka.

[]

QAYB CUSUB

WAC 296-62-60004 Shuruudaha ka-warbixinta loogu talagalay dillaaca inta lagu guda jiro xaaladda degdegga ah ee caafimaadka guud. Loo-shaqeeyayaasha waa in ay dillaaca cudurrada u soo sheegaan sida soo socota:

(1) Inta lagu guda jiro xaaladda degdegga ah ee caafimaadka guud, loo-shaqeeyayaasha goobtooda shaqada ay u shaqeeyaan in ka badan 50 shaqaale oo caymisan, waa in:

(a) Ay u soo sheegaan qaybta caafimaadka iyo ammaanka shaqada (DOSH) ee L&I 24 saacadood gudahooda ka-dib marka lagu soo wargeliyo:

(i) Toban ama in ka badan oo ah shaqaale caymisan oo baaritaan lagu xaqiijiyay ee jooga goobta shaqada halkaas oo baaritaanka la qaadey intii lagu guda jirey muddo kasta oo waqti ah waaxda caafimaadka ee gobolka Washington ama maamulka caafimaadka degaanka ee la hadla loo-shaqeeyaha in uu cudurka COVID-19 ka dillaacay goobtooda shaqada; ama

(ii) Toban ama in ka badan oo shaqaale baaritaan lagu xaqiijiyay halkaas oo baaritaanka la qaadey intii lagu guda jirey muddo kasta oo waqti ah inta u dhaxeysa barahan bilowga iyo dhammaadka:

Bilowga: Marka laba kasta ama in kabadan oo kiisaska shaqaalaha caymisan oo baaritaan lagu xaqiijiyay ee jooga goobta shaqada ay dhacaan 14 maalmood oo kuwa kalandarka ah oo isku xigxiga gudahooda midba midka kale.

Dhammaad: 28 maalmood oo kuwa kalandarka ah oo isku xigxiga ay ka soo wareegatey tan iyo natiijadii baaritaanka waa laga helay ahaa ee ugu dambeeyay ee loogu talagalay shaqaale kasta oo caymisan ee jooga goobta shaqada.

(b) Soo sheeg adiga oo wacaya DOSH 1-800-4BE-SAFE (1-800-423-7233), ka-dibna adeegsanaya ikhtiyaarka soo sheegidda dhimashooyinka, cusbitaal-dhigista, goynta xubno jirka ah, ama indho beel.

Waxyaabaha ka reebban:

• Loo-shaqeeyayaasha hadda ku jira xaaladda dillaaca cudurka looma baahna in ay sii wadaan ka-warbixinta DOSH ilaa iyo inta uu cudurka ka dhammaanayo.

• Loo-shaqeeyayaasha la kulma dillaaca cudurka ee markii dambe ogaadey in kiisaska soo dhexgaley ay ahaayeen waa laga helay oo been ah loogama baahna in ay dib-u-qiimeeyaan xaaladooda dillaaca iyo in ay u soo sheegaan DOSH. Waxay sii wadi karaan in ay u dhaqmaan sida in ay ku jiren isla dillaaca aan lahayn kala go'.

(2) Ujeeddooyinka qayb-hoosaaddan awgood:

(a) "Goobta shaqada" waxaa loola jeedaa warshad, deyr, dhismayaal, qol, ama goob kale ee shaqaalaha ay ka shaqeeyaan iyaga oo gudanaya shaqo adeeg ah ama xamaal ah taas o loo-shaqeeyaha xaq u leeyahay in uu galo ama kantaroolo.

(b) "Baaritaan lagu xaqiijiyey" waxaa loola jeedaa in laga helay cudurka faafa ama la iska kala qaado.

Muhiim ah: Marka aad u sheegayso DOSH, haku darin magacyada shaqaaaha ama macluumaad shaqsiga lagu aqoonsan karo.

[]

QAYB CUSUB

WAC 296-62-60005 Shuruudaha ogeysiiska ee la xiriira wajahidda suuragalka ah. Qayb-hoosaadyada (1) iyo (2) ee qaybtan waxaa lagu dabakhayaa loo-shaqeeyayaasha aan ahayn xarumaha daryeelka caafimaadka sida lagu qeexay RCW 9A.50.010. Qayb-hoosaadyada (3) iyo (4) ee qaybtan waxaa lagu dabakhayaa xarumaha daryeelka caafimaadka sida lagu qeexay RCW 9A.50.010. Qayb-hoosaadda (4) ee qaybtan waxaa lagu dabakhayaa dhammaan loo-shaqeeyayaasha.

(1) Marka laga reebo loo-shaqeeyahaasha ah xarumaha daryeelka caafimaadka sida lagu qeexay RCW 9A.50.010, haddii loo-shaqeeye uu helo ogeysiiska wajahid suuragal ah, loo-shaqeeyaha waa in hal maalin oo mid shaqo ah gudaheeda ee wajahidda suuragalka ah:

(a) Siiyaa ogeysiis qoraal ah dhammaan shaqaalahay caymisan kuwaas ku sugnaa dhismayaasha isla goobta shaqada isla maalintaasi(maalmahaasi) maadaama shaqsiga u-qalma marka shakhsiga u-qalma uu faafinayo ama laga qaadayo cudurka. Ogeysiiska qoraalka ah waa in uu sheego in shaqaalaha caymisan uu wajahay cudurka faafa ama la iska kala qaado.

(i) Cudurka COVID-19, shaqsiga u-qalma waxaa suuragal ah in uu cudurka faafinayay ama uu dad qaadsiinayay laba maalmood ka hor inta shakhsiga u-qalma uusan dareemin xanuunka/yeellan astaamaha (ama, dadka aan astaamaha ka muuqan, laba maalmood ka hor qaadista muunadda

baaritaanka) ilaa iyo waqtiga shakhsiga u-qalma uu kaga tagayey, iyo/ama laga karantiilayay, goobta shaqada.

(ii) Ogeysiiska qoraalka ah waa in loo sameeyaa habka loo-shaqeeyaha caadi ahaan u adeegsado in ku gudbiyo macluumaadka la xiriira shaqada oo ay ku jiraan, laakiinse aan ku xaddidneyn, adeeg shakhsiyeed, e-mail, ama farriin qoraal ah haddii si macquul ah loo filayo in uu ku helo shaqaalaha hal maalin shaqo gudaheeda ka-dib marka la diro.

(iii) Ogeysiiska qoraalka ah waa in ay ku qoran yihiin Af-Ingiriis iyo luuqad ay fahmaan shaqaalaha intooda badan.

(b) Ogeysiiska qoraalka ah sidoo kale sii:

(i) Wakiilka ururka shaqaalaha, haddii uu jiro, ama shaqaale kasta oo caymisan ee loo ogeysiiyay si waafaqsan WAC 296-62-600 ilaa 296-62-60005(1).

(ii) Adeeg caawimaad kasta oo ku-meelgaar ah, adeegga kiraysahsada shaqaalaha, ama hawlwadeennada u adeegaya loo-shaqeeyayaasha shaqaalaha caymisan ee loo ogeysiiyay si waafaqsan WAC 296-62-600 ilaa 296-62-60005(1).

(c) Shuruudaha habka ogeysiiska qoraalka ah iyo waqtiga ogeysiiska ee WAC 296-62-600 ilaa 296-62-60005 (1)(a)(iii) ayaa lagu dabakhayaa ogeysiiska wakiillada ururka shaqaalaha iyo loo-shaqeeyayaasha si waafaqsan qayb-hoosaaddan.

(2) Ogeysiis kasta oo qoraal ah ee waafaqsan qaybtan waxaa laga yaabaa in aysan ku jirin magacyada shaqaale kasta ama macluumaad lagu aqoonsan karo shakhsiga.

(3) Loo-shaqeeyayaasha ah xarumaha daryeelka caafimaadka sida lagu qeexay RCW 9A.50.010 waa in ay:

(a) Ogeysiiyaan shaqaale kasta wajahidda halista sare ee la tuhunsan yahay ama la ogyahay ee cudurka faafa ama la isqaadsiin akro 24 saacadood gudahooda.

(b) Iyagoo oggolaansho ka haysta shaqaalaha, ogeysiiyaan wakiilka ururka shaqaalaha, haddii ay jirto, wajahida halista sare ee la tuhunsan yahay ama la garanayo ee shaqaalaha ee cudurka faafa ama la kala-qaadi karo 24 saacadood gudahooda.

(4) Ujeeddooyinka qayb-hoosaaddan awgood:

(a) Wajahidda halista sare. Waxaa loola jeedaa ku sugnaanshaha mid ka mid ah xaaladahan soo socda iyadoo aanan la xiran qalabka neefsashada ee habboon oo la tijaabiyay iyo dhammaan qalabka kale ee is-ilaalinta shakhsiga ee loo baahan yahay.

(i) Lix cagood gudahooda ee shakhsiga u-qalma isugeynta muddo 15 daqiiqo ah ama in ka badan muddo 24-saac ah inta lagu guda jirey muddada gudbinta suuragalka ah ee shakhsiga u-qalma.

(ii) Isla qolka uu ku jiro shakhsiga u-qalma kaas oo uu ku socdo habraaca soosaaridda ayrosool. Liiska waxa loo arko in ay yihiin habraacyada soosaaridda ayrosoolka ayaa waxaa laga heli karaa https://www.doh.wa.gov/Portals/1/Documents/1600/coronavirus/COVID19InfectionControlForAerosolGeneratingProcedures.pdf.

(iii) Qof shakhsiga u-qalma uu ku marey habraaca soosaaridda ayrosoolka, ka hor inta aanan la joojin waqtiga ka nadiifinta.

Ogow: Shakhsiga u-qalma COVID-19 waxaa suuragal ah in uu cudurka faafinayey ama laga qaadi karey laba maalmood ka hor inta shakshiga u-qalma uusan dareemin xannuunka/yeellan astaamaha (ama, dadka aan astaamaha lahayn, laba maalmood ka hor qaadista muunadda baaritaanka) ilaa iyo waqtiga shakhsiga u-qalma uu kaga tagey iyo/ama laga karantiiley goobta shaqada, ama ilaa iyo inta laga gudbayo shuruudaha dib ugu soo noqoshada shaqada ee Xarunta Xakameynta Cudurrada (CDC) si waafaqsan borotakoolka shaqaaleynta lagu saleeyay, hadba kii dheeraada (eeg https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/hcp/mitigating-staff-shortages.html; dated December 23, 2021).

Ogow: Waqtiga ka nadiifinta waxaa loola jeedaa qaddarka waqtiga ay qaadaneyso in ayrosoolka looga saaro qolka iyadoo lagu saleynayo tilmaamaha CDC ee hufnaanta bixinta boqolkiiba 99.9. (eeg https://www.cdc.gov/infectioncontrol/guidelines/environmental/appendix/air.html#tableb1). Waqtigani kama badna saddex saacadood ka-dib gebbogabeynta habraaca. Hal saac ayaa ku filan goobaha caafimaadka ee loo dhisay si waafaqsan shuruudaha xarunta caafimaadka ee DOH (lix hawo isdhaafsi saacadii) iyo 15 daqiiqo ayaa ku filan qolka soocidda caabuqa hawada raaca (AIIR).

(b) Ogeysiiska wajahidda suuragalka ah. Waxaa loola jeedaa mid ka mid ah kuwan soo socda:

(i) Ogeysiis la siiyey loo-shaqeeyaha oo ka yimid sarkaalka caafimaadka guud ama bixiye adeeg caafimaad oo shati-haysta in shaqaale uu ku wajahay qof u-qalma goobta shaqada;

(ii) Ogeysiis la siiyey loo-shaqeeyaha oo ka yimid shaqaale, ama xiriirkooda xaaladaha degdegga ah, oo sheegaya in shaqaaluhu uu yahay shakhsi u-qalma; ama

(iii) Ogeysiis loo marayo borotakoolka baaritaanka loo-shaqeeyaha oo sheegaya in shaqaalaha uu yahay shakhsi u-qalma.

(c) Shakhsiga u-qalma. Waxaa loola jeedaa qof kasta oo leh:

(i) Baaritaanka shaybaarka ee waa laga helay ah ee cudurka faafa ama la iska kala qaado ee ah mowduuca xaaladda degdegga ah ee caafimaadka guud;

(ii) Oggaanshaha waa laga helay ah ee cudurka faafa ama la iska kala qaado ee ah mowduuca xaaladda degdegga ah ee caafimaadka guud ee bixiyaha daryeelka caafimaadka ee shatiga-haysta;

(iii) Amarka lagu soocayo ee ka soo baxay sarkaalka caafimaadka guud ee cudurka faafa ama la iska kala qaado ee ah mowduuca xaaladda degdegga ah ee caafimaadka guud;

(iv) U dhintey sababo la xiriira cudurka faafa ama la iska kala qaado ee ah mowduuca xaaladda degdegga ah ee caafimaadka guud, ee go'aaminta waaxda caafimaadka ee degaanka.

(d) Goobta shaqada. Waxaa loola jeedaa dhismaha, dukaanka, xarunta, dhul beereedka, ama goobta kale ee qofka u-qalma uu ku shaqeynayay. "Goobta shaqada" ka mid ma ahan dhismeyaal kasta, dhulalka, ama goobaha kale ee loo-shaqeeyaha ee qofka u-qalma uusan galin.

[]

QAYB CUSUB

WAC 296-62-601 Isticmaalka qalabka is-ilaalinta ee shakhsiga ee iskaaga ah ee xaaladda degdegga ah ee caafimaadka guud.

[]

QAYB CUSUB

WAC 296-62-60101 Ujeeddada iyo baaxadda. WAC 296-62-601 ilaa 296-62-60103 waxay dhigayaan shuruudaha loogu talagalay isticmaalka shaqaalaha ee qalabka is-ilaalinta ee shakhsiga inta lagu guda jiro

xaaladda degdegga ah ee caafimaadka guud, si waafaqsan cutubka 146, Sharciyada 2021 (SB 5254); Ee ku saabsan isticmaalka qalabka iyo aaladaha ilaalinta inta lagu guda jiro xaaladda degdegga ah ee caafimaadka guud, cutubka 252, Sharciyada 2021. Shuruudahan waxaa lagu dabakhayaa loo-shaqeeyayaasha ku dhaqan gobolka Washington inta lagu guda jiro xaaladda degdegga ah ee caafimaadka guud.

[]

QAYB CUSUB

WAC 296-62-60102 Qeexid. Shaqaale. Waxaa loola jeedaa shaqaale kasta ee uu loo-shaqeeyaha ka mas'uul yahay in uu ku diiwaangeliyo dhaawacooda iyo jiradoodaba diiwaanka 300 OSHA ee loo-shaqeeyaha iyadoo la raacayo WAC 296-27-02103, oo ay ku jiraan shaqaalaha ka socda adeegga caawimaadda ku-meelgaarka ah, adeegga kiraysashada shaqaalaha, adeegga keenista hawlwadeennada haddii ay u kormeerayaan shaqaalaha si maalinle ah oo waafaqsan WAC 296-27-02103(2).

Xaaladda degdegga ah ee caafimaadka guud. Waxaa loola jeedaa baaqa ama amarka la xiriira xakameynta iyo ka hortagga faafidda cudur kasta oo faafa ama la iska kala qaado ee ku saabsan awood kasta halkaas oo shakhsiga ama ganacsiga uu ka shaqeeyo, waxaanna loo soosaaraa sida soo socota:

(a) Madaxweynaha Mareykanka ayaa waxaa uu ku dhawaaqey xaalad degdeg ah oo qaran ama mid gobol;

(b) Guddoomiyaha wuxuu ku dhawaaqey xaalad degdeg ah sida ku cad RCW 43.06.010(12); ama

(c) Amarka waxaa bixiyay sarkaalka caafimaadka ee degaanka iyadoo la raacayo RCW 70.05.070.

[]

QAYB CUSUB

WAC 296-62-60103 Shuruudaha isticmaalka iskaaga ah ee qalabka is-ilaalinta ee shakhsiga. (1) Loo-shaqeeye kasta ee aan ugu baahnayn shaqaalaha ama qandaraaslaha in uu xirto nooc qalabka is-ilaalinta ee shakhsiga oo gaar ah waa in uu ku waajibiyo shaqaalahiisa ama qandaraaslahiisa isticmaalka iskaaga ah ee nooca aaladda ama qalabka is-ilaalinta gaarka ah, oo ay ku jiraan gacmo-gashiyo, ookiyaalayaal, difaaca wejiga, iyo weji-xir, maadaama shaqaalaha ama qandaraaslaha uu u arko in ay lagama maarmaan tahay.

(2) Qodobbada qayb-hoosaadda (1) qaybtan ayaa keliya la dabakhayaa marka:

(a) Isticmaalka iskaaga ah ee qalabkan iyo aaladahan is-ilaalinta aysan u keenaynin khatarro degaanka shaqada iyo in uu waafaqsan yahay qoddobada cutubkan, iyo sharciyada la xiriira ee u degsan waaxda shaqaalaha iyo warshadaha (L&I) qaybteeda caafimaadka iyo ammaanka shaqada (DOSH);

(b) Isticmaalka wejiga xirka ma faragelinayo shuruudaha ammaanka ee loo-shaqeeyaha; iyo

(c) Isticmaalka iskaaga ah ee qalabkan iyo aaladahan is-ilaalinta ma khilaafsana jaangooyooyinka noocaas qalabka ee gaarka ah ee u degsan waaxda caafimaadka ama DOSH.

(3) Loo-shaqeeyaha wuxuu xaqiijin karaa in isticmaalka iskaaga ah ee qalabka is-ilaalinta shakhsiga in uu ka soo baxaayo dhammaan shuruudaha nidaamka ee caafimaadka iyo ammaanka ee goobta shaqada.

[]